

## Fahamka natiijadaada togan ee COVID-19

*Tilmaamaha dugsiga: Macluumaadka soo socda waa in la daabaco lana siiyaa waalidka ama wakiilka ardayga la baadhay ama xubinta shaqaalaha ah ee la baadhay.*

**Magaca ardayga:** \_\_\_\_\_

**Taariikhda baaritaanka:** \_\_\_\_\_

Maanta, adiga / ardaygaaga waxa **la idinka helay** baardhitaanka COVID-19. Tani waxay ka dhigan tahay in adiga / ardaygaaga aad qabtaan COVID-19. Tani waa suurto gal xitaa haddii adiga / ardaygaagu aydaan lahayn wax calaamado COVID-19 ah ama aadan garanayn qof qaba COVID-19. Fadlan wac daryeel caafimaad bixiyahaaga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan COVID-19.

Natiijadaada togan waxaa lagu soo wargelin doonaa waaxda caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga, laakiin natiijada baaritaankaaga haddii kale sir ahaan baa loo ilaalin doonaa.

Haddii adiga/ardaygaagu aad leedihiin caalmado iyo haddii kalaba, **guriga jooga oo ka dheeraada dadka kale.** COVID-19 si fudud ayuu ugu faafi karaa dadka kale. Ka wac waaxda caafimaadka dadweynaha ee deegaanka \_\_\_\_\_ si aad u hesho tilmaamaha ku saabsan isgo'doominta adiga/ardaygaaga iyo kaarantiilka wixii xiriir kuu dhow. Caafimaadka dadweynuhu waxa uu sidoo kale kaa caawin karaa inuu ku xiro qoyskaaga adeegyada aad heli karto adiga/ardaygaagu inta aad ku jirtaa isgo'doominta ama karantiilka.

Waxaad ku heli kartaa dhokumentigan luqaddo kale, far waaweyn, qoraalka indhoolaha, ama qaabka qoraal ee aad doorbidayso. Kala xiriir Qaybta Jawaab-celinta iyo Ka soo Kabashada ee Koronafayras (CRRU) halkan 503-979-3377 ama iimayl [CRRU@dhsosha.state.or.us](mailto:CRRU@dhsosha.state.or.us). Waanu aqbalnaa dhammaan wicitaannada gudbinta ama waad garaaci kartaa 711.